**SHARCI Lamb. 9 EE 30 SETEMBER 1956**

**XEER NIDAAMIYAHA MAAMULADA DOWLADDAHA HOOSE**

MAAMULAHA

Kadib markii laga ansixiyey golaha xeer dejinta

**WUXUU AMRAY SOONA SAARAY**

Sharciga halkaan ku qoran:

**CINWAANKA 1AAD**
Tilmamaaha Guud

**Qod. 1**

Magaala madaxda waxay noqon doonaan halka laga xukumo Maamulka Dowladda Hoose .

**Qod. 2**

Waxaa laga dhisi kara Maamul Deegan goobo ka duwan kuwaa sare lagu xusay, kadib markii ay yeeshaan tiro dadka ku nool iyo qab nololeed oo ballan qaadi karta in laga helo goobahasi adeegyada deegaan ama ay marxaladda goobtaasi ay sidas ku taliso.

**Qod. 3**

Dhismaha iyo xadka Maamulka Dowladaha Hoose waxaa Maamulaha Guud ku qoondeyn doono dekreeto, isagoo la tashtay Golaha Wasiiradaha iyo soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha. Wixii wax ka beddel aha ee lagu sameeyn doono waxaa lala tashanay Guddiga Deegaanka.

**Qod. 4**

Maamul kasta ee Dowladda Hoose wuxuu leeyahay aqonsi qeynuuni ah.

**Qod. 5**

Wuxuu sharcigaan qeexayaa qeybaha uu Guddiga Deegaanadu u qeysamaan:

- Dufcadda A) GuddigaDeegaanka Muqdisho;
- Dufcadda B) GuddigaDeegaan ah magaalaha madaxda Gobolka ama leh tirada dadka deggen aan ka yareeyn 8000 oo qofood;
- Dufcadda C) Maamul Deegaan oo dadka deggen ay ka yareen 3,000;
- Dufcadda D) Nocyada kale ee maamul deegaan oo intaas aanan ahayn.

**Qod. 6**

Maamul kasto Dowladda Hoose wuxuu leeyahay Madasha, Guddi iyo Duqa Magaalada, wuxuu kale oo leeyahay Xoghaye iyo saldhig xafiis.

## CINWAANKA 2AAD
Xubnaha Guddiga Deegaanka

## MADAXA 1AAD

## XEERKA GUUD IYO GUDDIGA DEEGAANKA

### Qod. 7

Guddiga Deegaanku wuxuu ka kooban yahay:

— 25 xubno ee magaaladda Muqdisho;
— 21 xubno loogu tala galay Maamul Deegaanada dufcadda B;
— 15 xubno ee loogu tala galay Maamul Deegan ee dufcadda C;
— 11 xubno ee loogu talay Maamul Deegan ee dufcadda D.

### Qod. 8

Waxaa isu soo sharixi kara La taliye Deegaan rag keliya oo ka soo bixi kara shuruudaha hoos ku qoran:

a) Magacooda laga helo xafiiska diiwanka dhalashada ugu yaraan 9 bilood ka hor intii aanan la gelin dorashada
b) In ay jiraan ugu yaraan 21 sano maalinta uu dorasho dhici doonto
c) In ay cafimaad dhimirka qabaan, ama aysan lagu xukminin ddambi ay galeen awgeed muddo ka badan 3 sano
d) In ay afka Carabiga ama Talyaaniga ay qori ama akhrin karaan

### Qod. 9

Isuma sharixi karaan jagada La-taliye Guddiga Deegaanka:

a) Xeer Ilaaliyaha amd Guddomiyaha Degmada, shaqaalaha Golbolka iyo Degmada laga rabo in doorashadu ka dhacdo;
b) ShaqaalahaGuddigaDeegaanka;
c) Garsoorayasha;
d) Militariga iyo kuwa u yaalka ah.

### Qod. 10

Isku waqti islama hayn karaan jagada Maamul Deegan laba is dhashay ama wada dhashay.

### Qod. 11

Jagada La-TaliyahaGuddigaDeegaanka wuxuu khilaaf ku yahay jagada xildhibaanka Guddiga Sharci-Dejinta.

### Qod. 12

Marxaladaha jiray ama si lama fiilan aha ugu dhaco La-taliye Deegan waxay hor istaagi karan magaabidda qofkaasi inuu helo jagadaasi.

**Qod. 13**

Guddiga Deegaanka wuxuu isugu imaan kara markii Deega magaalada dalbada ama Guddiga Deegaanka codsado amase 1 dhig tirada La-Taliyasha Deegaanka ay weydiistaan in la kulmo. Waa in 15 beri gudahooda ka bilaabata maalintii codsiga ama go'aanka la gaaray uuGuddigaDeegaanka wada kulma.

Isugu yeerida Guddiga Deegaanka waxay noqoneysa farrin qoraal ah oo la gaarsiiyo xubnaha ama guryahooda.

Farrin qoraalkaasi waa in uu caddeya arrimaha laga hadli doono, waxaa loo geyn doonaa 3 beri ka hor intii uusan dhicin shirkaasi, waxaana lagu soo daabici doonaa Diiwaangelinta Deegaana isla waqtigaasi.

**Qod. 14**

Guddiga Deegaanka ma gaari karo go'aan haddii aysan soo xaadirin ugu yaaran kala barka xubniisa.

Haddii isugy yeeridi 1aad la gaaari waayo halbeega sharci ah, waxaa la qaban doona kulan kale oo la muddeeyo maalin ka duwan kulaankii 1aad, go'aanada ka soo baxa shirkasi waxay noqon doonaan mid ansax ah oo keliya haddi ay soo xaadireen 4 u dhig 1 dhig xubnaha Guddiga. Isugu yeeridaan waa in ay noqotaa mid farrin qoraal ah oo gacanta la saaro ama guriyahooda la gaarsiyo ka hor muddada kulanka.

**Qod 15**

Guddiga Deegaanka wuxuu ka gaari karaa go'aan soo jeedin ama arrimo ka baxsan ujeedada kulaankas.

**Qod. 16**

Guddiga Deegaanku wuxuu go'aan ka gaari karaa inta uu sharci awooda u siiyey ka sokow arrimaha hoos ku qoran:

1) Magacaabidda Guddiyada lagu idmay hal amar sharci;
2) Magacaabidda, hakinta iyo ruqseynta Xoghayaha Deegaanka;
3) Dejinta xeer nidaamka shaqaalaha iyo xeeraka kale ee deegaanka;
4) Sdhismaha iyo howlgelinta adeegyada guud;
5) Abaabulka canshuuraha, ganax iyo tariifooyinka;
6) Misaaniyada hordhaca ah iyo wixii wax ka bedelidda ah;
7) Misaaniyadda la isticmaalay;
8) Talinta qaan sheegatooyinka taagaan iyo kuwii la soo dhaafay oo ka badan muddada 5 sano;
9) Iibsashada iyo beec geynta hantida maguurtada ah;
10) Dhul bixinta;
11) Qorshooyinka dhisidda jidadka magaalada iyo barxadaha;
12) Qabeynta dhismaha magaalada lagu nool yahay.

**Qod. 17**

Guddiga Deegaanku wuxuu u xilsaari karan xubnihiisa ama khabiro ka baxsan Dowladda Hoose in ay ka soo baaran degaan arrimo u bahaan baaris dheeri ah.

**Qod. 18**

Fadhiyada Guddiga Deegaanku waa mid furan markii laga reebo marxalada laga baaran deega arrimo shaqsi khuseeyo.

Magaabista Duqa magaalada iyo gacanyarayaasha iyo guddi hoosaadyada waxaa lagu gaari doona kulan u furan dadweyneha.

**Qod. 19**

Waxay xubnaha Guddiga Deegan yeelan doonaa fadhi kasto ay ka qeyb qaatan gunnoyinka soo socda:

- 20 Shilling oo xubnaha magaaladda Muqdisho la siin doono;
- 15 Shilling oo la siin doono xubnahada Guddiga Deeganka ee dufcada B;
- 10 Shilling oo la siin doon xubnaha dufcadda C iyo D.

**Qod. 20**

Walaayada aya iska leh awood in ay isugu yeerto Guddiga Deegaanka iyo haddi ay ka gaabiyaan shaqadooda si ay go'aamiyaan howlaha laga rabo.

## Cutubka 2aad

Madasha Deegaanka

**Qod. 21**

Madasha Deegaanka waxaa laga soo xulaa Guddiga Deegaanka dhexdiisa. Haddii dadka ku tartamaaya jagadaani ay heli waayaan tirada coda ee ugu badan sida uu qoraayo qod. 43, Guddiga Deeganka waxaa tartansiin doonaan musharaxadyada helay codadka badan markii la isgu noqday cod bixin labaada waxaa loo qaadan doona kalkaaliye kuwa hela codadka ugu badan.

Madasha Deegaanka waxaa la soo xuli doona kadib markii la doorto Duqa magaalada, haddi ay ku soo aado waqti fassax lagu jiro waxaa la dooran doona kal fadhiga ugu horeya kadib markii fassaxa laga soo noqdo.

**Qod. 22**

Madasha Deegaanku wuxuu ka kooban yahay Duqa Magalada iyo tirada kalkaliyasha hoos ku qoran:

- 6 kalkaaliye ee magaalada Muqdisho;
- 4 kalkaaliye Guddiga Maamulada dufcada B;
- 2 kalkaaliye ee Guddiga Maamulka ee dufcada C iyo D.

Waxaa loo magacaabi karaa in ay la shaqeeyaan Guddiyadda Maamulka ee kasta 2 kalkaaliye oo dheeraad haddii loo baahdo.

**Qod. 23**

Kal fadhiga Madasha Deegaanka waxaa uu ku imaan kara isugu yeerida Duqa Magalada iyo codsi ka yimaada ugu yaraan kala barka kalkaaliyaasha.

Kal fadhigu waa in uu dhaca 7 beri gudahooda laga bilaabo maalintii la codsaday

Haddii aanan loo qoondeynin maalmo go'an ee usbuuc leh aha ama bill eh ah waxaa kulaankaasi la isu yeeri doona qoraalo oo loo geeyo kalkaaliyasha ama guryahooda la geeyo maalin waqtiga la mudeeyey kulankaasi.

**Qod. 24**

Madasha Deegaanku go'aan ma gaari karto haddii ugu yaraan kala bar xubnahooda aysan soo xaadirin.

Markasto waxaa qasab ah in uu kulaankasi Duqa Magaalada uu xadir yahay.

**Qod. 25**

Madasha Deegaanku waxay go'aan ka gaari karta arrimaha hoos ku qoran:

1. Magacaabista, shaqo hakinta, iyo ruqseynta shaqalaha iyo mushaarleyda;
2. Gunnoyinka shaqalaaha maalinleyda ah;
3. Maamulka adeega dadweynaha;
4. Mas'uuliyada qaansheegata taagan iyo kuwii laga soo gudbayay oo aanan khuseynin muddo 5 sano ka badan;
5. Hirgelinta amarada iyo maxkameynta isu taagidda.

Guud ahaan Madashu waxay go'aamin doonta arrimaha la xiriira Dowladda Hoose oo aan hoos tageynin awooda Guddiga Deegaanka ama Duqa Magaalada.

**Qod. 26**

Howlaha Madasha Deegaanka waxaa ka mid:

a) In uu aababulo doorka canshuuraada iyo kuwa deegaanka;
b) In ay qeyb ka qaadato qorshaha misaaniyadda;
c) In ay soo jeediso xeerarka la horgeyn doono Guddiga Deegaanka.

Madashu waxay diyaarineysa xisaababka sanadkii tegey iyo xisab celinta Guddiga Deegaanka la horgeyn doono.

**Qod. 27**

Madasha Deeganta waxay kormeeri doonata habka socodsiinta adeegyada deegaanka iyo iswaafijiinta go'aanada uu Guddiga Deeganku gaaray.

**Qod. 28**

Madashaa Deegaanka wuxuu wakiil ka yahay Guddiga Deegaanka muddada kulaaamadooda wuxuuna ka qeyb qaadanaya xafladaha iyo dhacdooyinka muhim ah.

**Qod 29**

Iyadoo tixraacayo xaalada dhaqaale ee Dowladda Hoose, Guddiga Deegaanka wuxuu u qorayaa Duqa Magaalada iyo kalkaaliyaasha gunooyin la xiriira jagooyinka ay hayaaan:

Gunnoyinka kalkaaliyaasha bil kasta ka badnaan karto:

— 300 Shiliing oo la siin doono kalkaaliyaasha magaalada Muqdisho;
— 200 Shilling kalkaaliyaasha Maamulka Deegaanada ee ducfada B,
— 100 Shilling kalkaaliyasha Maamulada Deeganada dufcadda C iyo D.

Go'aan lagu guddoonsiyeynsiiyey gunnada Duqa Magaalada waa in Maamulka Waalayada ay aqbasha.

## Cutubka 3aad

Duqa Magaalada

### Qod. 30

Duqa Magaalada waa madaxa Dowladda Hoose waana Sarkaal ka tirsan Dowladda.

### Qod. 31

Duqa Magaalada waxaa iska soo dhex doortay Guddiga Deegaanka, iyo cod sir ah loogu codeeyey kal fadhigooda kowaad, haddii ay fassax ku jiraan kal fadhiga ku xiga markii laga soo noqdo fassaxaasi.

Haddii qofka u tartamaaya jagada Duqa Magaalada u heli waayo tirada codka ugu badan sida uu qoraayo qod. 43, Guddiga Deeganka waxaay tartansiin doonaan 2da musharaxad oo helay codadka ugu badan markii la isugu noqday cod bixinta labaada, waxaa markas loo qaadan doona shaqsiga hela codadka ugu badan.

Kulanka lagu dooran doono Duqa Magaalada waxaa madax ka noqon doono qofka ugu da'da weyn ee Guddiga Deegaanka.

### Qod. 32

Duqa Magaaladu inta uusan bilaabin howshiisa waxaa uu ku hor dharanaya Waalayadda horteeda isagoo ku dhaaranaya sidatan:

*"WAXAAN KU DHAARANAYAD IN AAN WAAJIBAADEKEEYGA SHAQO KU GUDAN DOONOSI HUFAN OO DACAAD AH, IYO IN AAN U HOGGANSANAADO SHURUCDA ANIGOO HORMARINAAYA DANTA GUUD".*

Duqa Magaalada oo diida in uu ku dhaarto sida ku qoran qodobkaan ama aan dhaaran muddoada hal bil gudahooda ee bisha loo dortay jagadaasi, haddii aysan jirin asbaabo macquul ah wuxuu ka dhici doona jagadiisa.

### Qod. 33

Duqa Magaalada waa madaxa Maamulka Dowladda Hoose wuxuuna awood u leeyahay in:

- isugu waco haddana guddoomiya Guddiga Deegaanka;
- isugu yeero haddana guddomiya Madasha Deegaanka, in uu u kala qeybiyo howlaha kalkaaliyaasha, kormeera galalka howshooda kadibna saxiixa go'aanada ka soo baxa;
- In uu fuliyo go'aanadda Guddiga iyo kuwa Madasha haddana saxiixa qoraalada tilmaamayo danaha Maamulka Dowladda Hoose;
- In uu ku metelo heshiisyada danaha Maamulka Deeganka;
- In uu haqiijiyo u hoggansananta xeerarka;
- In uu soo saaro qoraalada rasmiga ah ee Maamulka Deeganka,
- In uu ku metelo maxkamadaha taagan ama loogu yeeray danaha Maamulka, iyo in uu fuliyo amaraada lagu caddeyey xuquqda Maamulka;
- In uu kormero xafiisyada iyo adeegyada deegaanka;
- In uu shaqo hakin ku sameeyn karo shaqaalaha musharleyda ah ee deegaanka ilaa iyo 10 beri, isagoo wargelin doona Madasha iyo Guddiga Deegaanka kullamadooda ugu horeya;
- In uu taakuleeyo mashaaricda hormarieed ee Maamulka Dowladda Hoose.

**Qod. 34**

Isagoo gudanaya wajiibakiisa sarkaalnimo wuxuu fulin doonaa arrimaha hoos ku xusan.

1) In uu xafiiskiisa Diiwaangelinta iyo Buugaga Diiwaangelinta xaalada guurka;
2) In si joogta ah loo xanaaneeyo keyda tirakooda dadweynaha;
3) In uu fuliyo awoodaha lagu siiyey dorashadiisa;
4) In uu hirgeliyo horumarinta faaya dhowrka iyo caafimaadka dadweynaha oo harcigu iyo xeraarku ay caddeyeen;
5) In uu wargeliyo maamulka ka sareeya dhacdooyinka qiimaha ugu fadhiya dadweynaha,
6) In guud ahaan uu fulin wajiibaadka uu si sharci ah ku helay.

**Qod. 35**

Waxaa hoos yimaad Duqa Magaalada fulinta maradda la xiriira dhismooyinka, ciidanka deegaanka, faaya dhowrka dadweynaha iyo amaradaada kharajyada adeegyadaasi iyo metelaada maxkamadaha horteeda.

Kadib markii la tixraacay aragtida maamulka walaayada waxaa la fulin doona bixinta qaanshegaatoyinka ku saleeysan qaabka iyo canshuurta lagu caddeyey xeerarka.
Duqa Magaalada wuxuu u wakiilan karaa howlaha qaarhood kalkaaliyihiisa

Wakiilnimadaasi waxaa lagala noqon kara waqti kasta ka hor intuu Duqa Magaalada uusan jagada dhicin amase uusan laga hakin.

**Qod. 36**

Adeega Khasnadda ee ku qoran qodobka 35aad waxaa uu dabooli doona howlaha Diiwaangelinta ee ay Walaayadu u baahato ama ay hey’adaha hoos yimada ama ay ayadu maal gelisay u bahdaan.

**Cutubka 4aad**

Muddada Xafiiska Golaha Deegaanka iyo Duqa

**Qod. 37**

Guddiga Deegaanka, Madasha Deegaanka iyo Duqa Magaalada waxay hayn doonaan jagooyinkiisa ilaa iyo 4 sano.

**Qod. 38**

La-Taliyaayasha iyo kalkaaliyaasha oo aan soo xaadirin ilaa 3 kal fadhi oo isku xiga, sabab la’aan waxay ka dhacayaan jagadooda.

Ka dhicidda jagadda waxaa ku dhawaaqi doona La-taliyaha Dowlada Hoose, kadib markii la sugey ilaa 10 beri si uu ula yimaadin asbaabta maqnaashaqda, sidoo kale haddii La-taliyuhu oo muddo 20 beri gudahooda ku dhawaaqin ka qaadista shaqada, waxaa la wareegi doono Maamulka Walaayada oo caddeyn doona in laga qaaday.

Shaqo ka tegidda La-Taliyaha, kalkaaliya ama duqa magaalada waa in Guddiga ama Madashu aqbalaan.Haddii ay shaqo ka tegidaasi laga aqbali waayo, waxaa lagu talaabsan doono in si ku meel gaar lagu bedelo dad kale.

**Qod. 39**

Hey'adaha ka mid ah maamulka lacagta ama hantida, waxay sanad kasto keeni doonan xisaab celin oo ay ku soo dari doonaan xisaab celinga haddi ay jiraan hey'ada xiriir la leh sida ku cad xeerarkooda.

Waxaa ka reeban xisaab celinta maxkamadeed saraakisah dowladda iyo kuwa militariga ah kharjyadad ay si horumaris ah u heleen ama qalab guurto ah, taaso oo ay ka mid yihii ilaalinta ama istimaalka cilmi barista iyo farshaxanka.

**Qod. 40**

Guddiga Deegaanka ma baari karo ama go'aan kama gaari karo Madasha Deegaank iyo Duqa Magaalada haddii marka hore lagu ay soo jeedin hab qoraal ugu yaarn 3 u dhig tirade La-taliyaasha.

**Qod. 41**

Duqa magalada waxaa shaqada ka hakin kara Xeer Ilaaliyaha iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, arrimo la xiriira nabadgelyada dadweynaha ama ku xad gudubka wajiibkooda.

La-Taliyaha Deeganaka aya soo magacaabi doono ciddi lagu beddeli lahaa.

**Qod. 42**

La-Taliyayaasha Deegaanka waxaa kala diri kara Wasiirka Arrimaha Gudaha haddi ay jiraan arrimo culus ee la xirira nabadgelyada dadweynaha ama ay cadato in si joogta ay ku xad gudbaan sharci.

Waxaa qasab in 6 bilood gudaheeda la qabto doorashooyinka

Haddii La-taliyayaasha la kala diro, Maamulka Walaayadu waxay u dhiibi doonta jagada Guddomiye ku meel gaar ah oo Wasaarada Arrimaha Gudaha uu soo magacaabay.

**CINWAANKA 3AAD**

Kullamada iyo Go'aanada

**Qod. 43**

Codeynta kullamada waxay ahan doonan gacan tagmarkii laga reebo doorashada shaqsiyaad.

Go'aankasto ma yeelanayo saldhig sharci haddii uusan helin codadka ugu badan, waxaana la qaadan doona go'aanka yeesho codka ugu sareeyo

Waxaa saldhig u ah codeynta go'aanka lagu gaaro tirada si sharci ah u dhigan, waxaan micno leehayn tirada dadka codeeyey, kuwa ka aamusay haddii uu yahay codeynta sirta ahna lama qaadan doono warqadaha waxba lagu qorin ama kuwa si qalad ah loo qoray.

**Qod. 44**

Ciddii hoggamineysa kal fadhi wuxuu awood u leeyahay in uu amro dhowrista nidaamka, xeerarka iyo qeybinta doodaha iyo go'aanadda.

Waxaa kale uu awood u leeyahay in uu joojiyo ama amro in la kala tago iyadoo waajibka qoritaanka loo gudbiyo Walaayada.

Shirarka u furan dadweynaha, ciddi hoggamineysa wuxuu awood u leeyahay in uu ka bixiyo goobta ciddi qalalaaso iyo rabsho kicisa amaba uu amro in la xiro.

**Qod. 45**

Warbixinta qoraalka ah waxaa qori doono Xoghayaha kaas Guddomiyuhu hoos ka saxiixi doono.

Cid kasto oo ka mid ah Guddiga waxaa uu xaq uu leeyahay in codkiisa la caddeyo iyo sababta.

Warbixintaasi waa in lagu tilmaama taarikhda maalmeed, bisha iyo sanadka la qabtay kulanka, magaca xubnaha soo xaadiray iyo kuwa ka maqan iyo haddii ay jirto wax sabab ah oo ay u imaan waayeen, cidda hoggamineysa shirkaasi, magaca Xogheynta, qodobada dooda, tirade cidda iska leh codeynta, tirada cod-biyeyaalka ka soo horjeeda talada la soo jeediey, qaabka codeynta oo noqon karan mid furan ama mid qarsoodi ah iyo haddii shirku yahay mid furan ama mid aan dadweynaha loo oggoleyn.

Nuqullada asalka ah ee warbixintaasi waa in lagu keydiya Xafiiska Dowladda Hoose, Diiwaangelinta Xoghaya si loogaga hortado in ay kala dhumao sanadkasna la isigu uruuriyo.

**Qod. 46**

Go'aanada la xirira kharaj waa in la carifaa tirada lacagta iyo qabka bixintiisa.

**Qod. 47**

Waxaa wax kama jiraan go'aanada ka dhashay kal fadhi aan sharci waafaqsaneyn ama khuseeya arrimo ka baxsan awoodaha cidda goaamisay amase ka soo horjeeda sharciga guud ahaan.

**Qod. 48**

Maamul Deegaan kasto waa in uu yeeshay buug Keyd ah oo loogu tala galay in lagu faafiyo go'aanada, amarrada, dhacdooyinka ama qoraallada loo baahan yahay in la gaarsiiyo dadweynaha.

Go'aanada waa in la faafiyaa, iyadoo lagu soo badhigi doono Keydka maalmaha fassaxa iyo 10 beri gudahooda maalintii la gaaray go'aankaasi.

Bandhigga misaaniyada hor dhaca iyo xisaab celinta misaaniyadii la isticmaalay, xeerarka waa in lagu diiwaangeliya Xafiiska Dowladda Hoose 10 beri oo isku xigta is dadweynuhu u arkaan, iyo in lagu dhejiyo Diiwaangelinta Deegaanka in qoraalladasi laga heli karo meesha loogu tala Muwaadin kasto ee iska bixiya kharajka wuxuu xaq u leeyahay in nuqul laga siiyo go'aanadasi iyo xeerarka deegaanka.

Qorallada iyo wargelinnada lagu qoray Diiwaanka Dowladda Hoose waxay ku qoran yihiin afka Talyaaniga iyo afka Carabiga ah.

## CINWAANKA 4AAD
## Dhaqaalaha iyo Xosabaadka

### Cutubka 1aad U
Hantida, Daqliga iyo Kharajka

### Qod. 49

Maamul kasta  ee Dowladda Hoose waa in uu si joogta u xafido  Diiwaangelinta hantida guud, midda gurtada ah iyo midda ma guurtada ah. Diiwaangelintakaasi waa  in lagu qoro si waadax ah halka hantidaasi ay ka soo jeedaan.

Waxaa Diiwaangelinta-qoraalkaasi mas'uul ka ah Duqa Magaalada iyo Xoghaya iyo haddii ay qabaan qeybta Xisaabiyaha. Affartii sanaba waxaa la amraaya in dib loo baaro Diiwaangelinta- qoraalkaasi, wixii ku darsoomaya iyo wixii laga bedeley.

### Qod. 50

Hantida caadi ahaan waa la ijaari karaa.

Markii dib u eegid lagu sameynaayo misaaniyadda hor-dhaca aha, Maamylka Walaayada waxay xaqiijinaayada daqliga ijaarka in uu yahay mid ku habbon, haddi loo baahdo in la kordhiyo, waxaa la farayaa in dib loogu noqdo oo la suggo ijaar ku haboon.

### Qod. 51

Daqli Maamuladda Deegaanka waxay ka kooban yihiin:

— Daqliga ka soo gala hantida margurtada iyo gurtada;
— Daqliga ka yimaada kadib markii la gado hantida gurtada iyo tan magurtada ah;
— Canshuuraadka iyo ganaaxa lagu carifay Xeerka Canshuuraadka;
— Wax kasto oo daqli dhalin karo ee uu sharcigu oggol yahay.

### Qod. 52

Maamuladda Degaanku ma xambarsan karaan deyn aan khuseeynin arrimaha hoos ku qoran:

1) Haddii uusan deyntaasi lagu fulin doono mashaaric dadweyne ama dhismaha adeeg guud;
2) Haddii deyntaasi ahmiyadeedu tahay in lagu bixiyo deyn horay loogu yeeshay oo muddadeedi la soo dhafay, ama deym lagu iclaamiyey xukum maxkamdeed;
3) Haddii deyntaasi khuseyso raham oo lagu caddeeyey qaabka loo bixin lahaa xattaa dulsaarka.

Waxaa noqon doono deyn, heshiisyada dhismooyinka oo lagu cadeeyo in bixinta lacagaha ay noqon doonto 5 sano iyadoo la socoto dulsaar amase aysan la soconin.

### Qod. 53

Waxaa u baahan in la ilaliyo bixinta kharajka la xiriira qalabka ama adeegyada ay sababtoo baahi jirta sida:

1) Xafiidaada hantida deegaan iyo fulinta waajibaadkaasi;
2) Xafiisyada iyo xafiiska Diiwaangelinta deegaanka;
3) Musharaadka iyo gunnoyinka Xoghayaha iyo shaqaalaha kale, hey'adaha, mushaarleyda maalin laha ah, iyadoo la dhowri doono shuruucda iyo xeer-nidaamiyaha shaqaalaha;

4) Soo saarista Faafinta Rasmiga ah ee shuruucda iyo dekreetoyinka;
5) Ciidanka deegaanka iyo faaya dhowrka;
6) Adeegyada lacag aruurinta iyo kuwa bixinta;
7) Falal difaaca Maamulka Dowladaha Hooseka;
8) Adeega bulshada;
9) Diiwaangelinta tiraakoobka dadweynaha;
10) Kharajka doorashooyinka deegaanka;
11) Habeynta iyo ku dhaqanka goobaha loogu tala galay suqyada, biyo dhaamista, iyo bulaacadaha, kawaanadda, iyo qabuuraha;
12) Naleynta goobaha loogu tala galay;
13) Habeynta jidaadka iyo barxadaha;
14) Nadaafadda jidaadka iyo barxadaha;
15) Ilaalinta goobaha qubuurah ah;
16) Gaadiidka iyo duugiista meydaadka shaqsiyaadka la garan waayo ama masaakiinta ama kuwa aan ehel lahayn.

Waxaa kale oo waajib ku ah kharaajyada kale ee waajib si sharci ah ugu noqdo Maamulka Dowlada Hoose.

**Qod. 54**

Maamulka Dowladda Hoose waxay mas'uul ka yihiin dhismaha iyo fulinta adeegyada guud oo la xiriiira:

1) Dhismaha biyo mareeynta, ceelasha, (fontane), iyo qeybinta biyaha la cabo;
2) Dhismaha iyo gacan ku haynta kaawanada, kaas oo noqon kara mid gaar loo leeyahay iyo gaadiidka lagu qaado hilibka la qalay;
3) Dhisidda iyo gacan ku haynta goobaha suuqyada ah xattaa haddi si gaar ah loo leeyahay;
4) Dhismaha naleeynta iyo gacan ku hayntiisa iyo dhismaha motorada tamarta;
5) Dhaqaajinta iyo hagaajinta qashinka guryaha;
6) Suubinta iyo qeybinta barafka;
7) Xaafidada meelaha qaboojiyayaalka ee cuntada xuman karto;
8) Xayeesinta wargeysayada xattaa kuwa gaarka loo leeyahay oo ay ka reeban tahay xayeesinta doorashooyinta;
9) Dhismaha guryaaha wadareed ee dadweynaha loogu tala galay;
10) Gaadidka dadweynaha oo laga shaqeysiiyo iyo xiriirinta bulshada;
11) U gargaaridda howlaha masjidyada;

Adeegyada dadweynaha waxaa lagu fulin kara dhaqaale toos uga yimaada Maamulka Dowlada Hoose amase tartan, iyadoo la dhowri doono nidaam gaar ee la xiriir qaabka teknikada, maamulka iyo xisabaadka iyo canshuurta loo baahan yahay.

Kadib markii la aqbalo go'aanadda oo uu Guddiga Deegaanka loogu xaambariyo waajibaadka dhisidda iyo gacan ku haynta adeegayada dadweynhaa iyo kharajka la xiriira fulintooda.

**Qod. 55**

Kadib markii laga baraan dego baahida loo qabo iyo ku filaanshaha misaaniyadda, wasiirka Arrimaha Gudaha, isagoo la tashtay Guddiga Deegaankasi, wuxuu dekreeto ku amri kara fulinta dhismaha iyo gacan ku haynta adeegyada ku tixan qodobadda 1 ila 5 ee qodobka sare ku xusan.

Sidoo kale waxaa la amri karaa dhismaha jidadka, bulaacadaha, qubuuraha, ballarinta iyo dib u habeyntooda iyo dhismaha iyo gacan ku hayntooda ee dugsiyada hoose, kuwa dhallanka, kuwa ilmaha agoonta ah iyo gargaarka caafimad ee dadweynaha.

**Qod. 56**

Kharajyada gaarka ah waxaa lagu bixin kara oo keliya haddii lagu fulin doono adeegyo oo anfac dadweynaha u leh.

**Qod. 57**

Go'aanada lagu oggolaan karo heshiisyada iyo kharajkooda waa in ay ka muuqato qabka lagu fulin doono, iyadoo ay ku cad yihiin mashraaric, khubuurada iyo hordhac kharajka, taas oo la soo gaabin karo haddi kharajkaasi uusan ka badneyn 4,000 Shiling.

Wax ka bedel kasta ee mashaaricdaasi, khuburaadaasi aragtidooda iyo hordhac misaaniyadda ee la xiriira heshiisyadaasi waxaa laga doonaya in ay aqbalaan hey'adaha iska leh mas'uuliyaddasi.

## Cutubka 2aad
Adeega Maaliyadda

**Qod. 58**

Sanad maaliyeedku wuxuu bilaabanaya 1da Janaayo wuxuuna ku eg yahay 31 Diseembar ee isla sanadkaasi.Laakin dalabka daqliga la hubo ee ilaa iyo 31 Diseembar iyo bixinta kharajyada la ballan qaada isla waqtigaasi, xirmada xisaabtu waxay socon doonata ilaa iyo 31 Janaao ee sanadka xigga.

**Qod. 59**

Sanad maliyeedku wuxuu khuseeya howlahda isla sanadkaasi la qaban doono, xisaabaadkuna waxay tilmaami dooa maamulka misaaniyadda oo ka duwanaan karo isbedbedlidda tirada lacagta iyo qaabka hantida.

**Qod. 60**

Daqliga iyo kharajka lagu qoroo misaaniyada waxay yihiin kuwa lagu fulin doono isla sanad maliyeedka, kuwaas noqonayaa daqli la filaayo in uu soo xaroodo oo qeybo kala duwan dabooli doono iyo kharaj la bixin doono isla sanadkaasi.

Xisaabta misaaniyaddu waxaa ka mid daqli la hubo iyo midka horay u jiray, kharajka caadiga ah iyo kuwa lagu galay isla sanadkaasi, soo ururinta iyo bixinta kharajka isla muddadaasi.

Xisaabta guud ee hantida waxaa ka mid qiimeeynta hantida magurtada ah, iyo kuwa gurtada, Diiwaangelinta deymaha iyo amaahda iyo wixii laga bed-bedelay oo ka soo arooray maamulida misaaniyada ama qaab kale ku yimid.

**Qod. 61**

Misaaniyadda hor dhaca ah waa in la gaara go'aan ilaa iyo 15 Oktoobar ee sanadka ka horeyaa sanadka oo uu khuseeyo, iyadoo la tixraacayo qaabka oo uu soo jeediyey Wasiirka Arrimaha Gudaha, kaas oo lagu soo lifaaqi doono warbixinadda loo baahan yahay iyo asbaababa talooyinka la soo jeediyey.

Haddii laga gudbo muddadaasi iyadoo aan la dhameeystirin misaaniyadda hordhaca waxaa howshaasi la wareegi doono Waalayada.

**Qod. 62**

Cutubyahada daqliga iyo kharajku waxay u kala baxaan qeybo kala duwan oo tilmaamayo adeegyo kala duwan ama kuwa caadi ah iyo kuwa aan caadi ahayn ama haddii kharajkaasi yahay mid qasab ama mid iqtiyaari ah.

Waxaa lagu tilmaamay kharaj caadi ah kuwa khuseeya howlaha joogtada ah ee la xiriira shaqa maalmedka Maamulka Dowladda Hoose, kharajyada kale waa kuwa aan caadi ahayn.

**Qod. 63**

Misaaniyadu waa in lagu caddeya wax kasto oo haraa ee misaniyadii sanadyadii hore.

Haraaga misaaniyada waxaa loo isticmaali kara oo keliya kharajyada aan caadiga ahayn ama ku meel gaarka ah ee isla sanadkaasi. Kharajyadaasi waa in ay ku tilmaaman yihiin cutubyo u gaar ah oo cadeeynaya halka ay ka soo arooreen iyadoo ay wehliso ogoolanshada in haraagasi laga helay misaaniyad horay loo xiray oo la aqbali haraagasi in loo gudbiyo sanadka xiga.

Haddii naaqus laga dhaxlay misaaniyadii sanadkii la soo dhaafay waan in lagu cadeeya cutubkiisa.

Haddii xiridda sanad maaliyadeedku uu iskeeni waayo isago wata haraa iyo naaqus waxaa Guddiga Deeganka go'aamin doona habkii la isu dheeli tiri lahaa.

**Qod. 64**

Si loo gaaro isku dheli tirka misaaniyadda waxaa waajib ah in tira lacageed loo qondeeyo cutub lagu magacaabay 'raasimaalka keydka'.

Waxaa kale ee loo baahan yahay in la dhiso cutub si loo daboolo kharajyada lama filaaga ah, oo aan la qiyaasi Karin si hordhacna loogu qoondeyn Karin kharaj sababtoo oo aan horay loo ogeyn in ay dhici karaan, oo haddana haddi aanan la bixin kharajkaasi dhibaato u geysan karo adeega guud.

**Qod. 65**

Isku wareejinta cutubyada khuseeya kharajka waxaa muhim ah in bixinta kharajkuu uu yahay mid degdeg ah, lacagta loo baahan yahay ay ku jirtaa cutubkaasi ee misaniyadda sanad laha ah.

Waxaa reeban kala wareejinta kharajka aan ahayn mid degdeg ah iyadoo lagu dhameeyn karo bixinta kharajka caadi ah.

Waxaa kale ee reeban in la isku wareejiyo lacagaha haraaga ah iyo kuwa loogu tala galay sanad misaniyeedka.

**Qod. 66**

Lama oggola kadib markii la aqbalay misaaniyadda hordhaca ah in wax ka beddel kharaj lagu daro haddii aysan marka hore loo ogolanin qaabka beddelaadasi ku imaan karto.

**Qod. 67**

Waxaa mas'uulida isku dubaridka misaaniyada iska leh isagoo la tashanaaya Guddiga Deeganka, Maamulka Walaayada, kaas oo kala qeexi doono kharajyada qassab ku ah in la bixiyo iyo kuwa ay ku xiran tahay wajiib sharciyeysan oo ay xambaarsadeen.

**Qod. 68**

Guddiga Deegaanka wuxuu go'aaminaaya xisaababka misaaniyadda sanadkii tegey ilaa iyo 31 Maarso ee sanadka ku xiga. Haddii ay ka gaabsadaan go'aamintaasi ilaa iyo mudadda halkaan ku carifaan, waxay Maamulka Walaayadu la wareeji doonta go'aan ka gaarkaasi.

**Qod. 69**

Waxaa ka mid noqonaya haraa taagan iyo mid daboolan ee khuseeya sanad misaaniyadeed, daqli kasta ee la hubo oo aan la soo uruurin iyo kharajka kasta oo si sharci ah loogu yeesho oo aan la bixin.

Xisaabtaasi waa in laga bar duwaa xisaabta sanad laha lagu jiro.

Haraagaa daboolan waa kuwaan dhaafa muddada 2 sano.

**Qod. 70**

Haddi daqliga uusan dabooli Karin kharajka loo baahan yahay, wuxuu Wasiirka Arrimaha Gudaha awood u leeyahay in uu amro in hanti lacageed ee dheeraad ah la siiyo si loo gaaro isku dheeli tir.

**Cutubka 3aad**

Soo Ururinta Daqliga iyo Bixinta Kharajyada

**Qod. 71**

Lacag kasto ee lagu soo aruuriyey amarka ciddii u xilsaaraan waa in lagu shubaa qasnadda Dowladda Hoose waqtiga loogu tala galay.

**Qod. 72**

Xoghayaha Deegaanka iyo goobaha ay ka jiraan Xafiiska Xisaabaha waa in ay hubiyaan qaansheegatooyinga lagu leeyahay ee hoos yimaada cutubyada misaaniyadda iyadoo lagu qori doono buugga diwaanka loogu tala galay.

**Qod. 73**

Lacag bixid kasto waxaa u xilsaaraan waa in iyadoo dhan lagu shubaa xafiiska qasnadda ee dowladda hoose iyadoo la dhowraayo amarrada lagu soo saaray.

Amarrada bixista lacagaha waa in ay saxiixan Duqa Magaalada iyo Xoghayaha iyadoo uu la saxiixi doono xafiiska Xisabaha haddii ay goobtaasi ka jiro.

Ka hor intii aanan la amri in lacag la bixiyo waa in la hubsado asbaabta kharajka, la caddeyo in bixinta lacagtaasi aysan ahayn mid aan sharci ahayn, in lacagta aysan ka badneynin intii loogu qoondeyey in lagu bixiyo cutubkaasi ha ahaado cutub sanad misaaniyaad markaas socda ama cutub carifaaya haraaga misaaniyad sanadyadii la soo dhaafay.

**Qod. 74**

Qasnajiga dowladda Hoose wuxuu isticmaali doono hadba inta hanti aha ee ugu jirto misaaniyadda sanad laha.

Iyadoo si toos ah uga mas'uul noqon doono qasnajigu ma bixin karo lacag uusan amra uusan u haysanin amase u qorneyn qaabka loogu tala galay

Markii uu bixiyo lacagta lagu lahaa wuxuu qasnajigu ku shabadeyn doonaa qaansheegatada korkeeda erayga ah 'Waa la bixiyey'.

**Qod. 75**

Haddii qofka/heydaha iska leh qaanshegatada codsado waxaa lagu bixin kara qaab bangiga loo diro ama jeega boostada, kaas oo helitaanka lacagtaasi caddeyndoona in lacagtaasi la bixiyey.

**Cutubka 4aad**

Heshiisyada

**Qod. 76**

Heshiiyada khuseeya kala waarejinta, iibsashada, maamulida ama dhismaha waxaa qassab ah in lagu soo bandhigo tartan guud oo waafaqsan shuruucda heshiisyada dalka u dhigan.

Waa la ogol yahay in si gaar loo bixiyo heshiisyada leh qiimaha ka yar 10.000 Sh. Haddii muddada heshiiska ka dheer yahay 1 sano qiimaha waxaa lagu qoondeynaya tirade jaajaban ee sanadkaasi. Maamulada dowladaha hoose ee dufcadda C iyo D qiiyaasta lacagtaasi waa kala bar.

**Qod. 77**

Waxaa loo ogolyahay in si gaar ah loola heshiiyo, kadib markii laga baraan degey shirkadaha kale, shirkadda la fiilayo in ay ugu wanaagsan tahay oo heshiiku gaarayo lacagta dhan 5,000 Sh. Maamulada dowladaha hoose ee dufcada C iyo D qiimaha heshiiskaasi waa kala bar.

Heshiiyada gaarka loola galo haddii ay marxaladahan ay jiraan:

1) In cidna aysan ka soo qeyb gelin tartankii heshiiska amase cabsi ay jirto in aan laga soo qeyb qaadan doonin;
2) In soo saarka qalabka ay shirkad gaar loo leeyahay damaaniqaadi karto ama qaabka qalabka la doonaya aanan lagu soo bandhigi Karin si guud ahaneed;
3) In ka iibsashada qalabkuu ay ku kooban tahay shirkad gaar ah oo u leh khibrad dheerada ah kaas oo cid kale kula tartami Karin;
4) Markii ay degdeg loo doonaya iibista, ama howlaha ama adeega gaadiidka aysan jirin waqti lagu soo bandhigo tartan guud.

Marxaladaha ku qoran farqadaha sare ku xusan oo kallifaya in si gaar ah loo bixiyo heshiis waa in lagu qoraa warbixinta la xiriirta heshiiskaan.

**Qod. 78**

Maamulka Walaayada waxay fassixi karta heshiisyada si gaar ah loo galo oo ka duwan kuwa lagu xusay qodobada sare haddii loo gaarto in ay xaalado gaar iyo baahi gaar ay jiraan.

**Qod. 79**

Haddii loo garto in shirkado gaar ay leeyihin khibrad ama awood in ay hirgeliyaan mashaaric lagu tartami laha, Maamulka Deeganka kadib markii uu weydiisto in loo ogolaado waxay isugu yeeri karaan shirkadaasi si ay u fuliyaan mashaaricda iyagoo dhowraaya xaaladaha muhim u ah fulintaasi.

Go'aanada lagu aqabli doono in heshiisyada noocaasi ah lala galo shirkadaha gaarka ah waxaa looga baahan yahay in lagu cadeeyo qaabka mashruuca loo doonayo in loo fuliyo.

Aqbalidda heshiiyada noocan ahaa waxay hirgeli doonta oo keliya markii la helo aqbalidda Maamulka Walaayada.

**Qod. 80**

Waxaa muhim ah in ugu horreyntii la helo aqbalida Maamulka Waalayada markii lala xaajoonaayo heshiisyada ka baxsan marxaladaha ku qoran qod. 77.

Sidaas awgeed heshiisyada noocaan ah waa inloo soo gudbiyaa Maamulka Walaayadda iyadoo qoraalka asalka ah ku qoran 10 beri gudahooda maalintii heshiska lagu heshiiyay.

Haddii ay jiraan sababo culus ee la xiriira danaha shirkadda ma danaha dadweynaha, Maamulka Walaayada waxay ka noqon karaan ogolaashaha fulinta mashruuca xattaa haddii horay loo aqbalay.

**Qod. 81**

Xoghayaha Deegaabjy wuxuu codsan karaa isagoo dhowraaya Maamulka Dowladda Hoose dhammaan qoraallada iyo heshiisyada ku xusan qod. 76.

**Qod. 82**

Si loo fuliyo howlaha loo baahan yahay in lagu tartamo, Maamulka Dowladda Hoose waxay isticmaali doona amarradda guud ee loogu tala galay howlaha Dowladda.

Saraakiisha dowladeed waxay yeelan doonana xilka kormeerka iyo tijaabada mashaaricda laga fulin doono dowladaha hoose.

## CINWAANKA 5AAD

Kormeerka iyo Dacwooyinka

**Qod. 83**

Markii laga reebo dowladdaha hoose ee dufcada A iyo B, waxaa awooda ilaalinta ee Maamulka Dowladda Hoose iska leh Xeer Ilaaliyaha isagoo kaashanaya Guddomiyaha Deegaanka.

Xeer Ilaaliyuhu wuxuu kormeeri doona qaabka Maamulada Dowladaha Hoose isago amri doono baaritaan iyo haddii loo baahdo- markii ay marxalad degdeg ah iyadoo la dhowri doono amarrada guud ee badbaadinta dadweynaha.

Wuxuu Xeer Ilaaliyuhu yeelan karaa awoodda dheeraadka ah ee ah in si toos ah u maamulo goodaha oo aan ka mid ahayn dowladaha nooca A iyo B haddi aan lagu qancin kormeerka Guddomiyaha Deegaanka.

**Qod. 84**

Go'aanadaasi oo ah laba nuqul waa in maalinta ku xigta markii la soo bandhigay loo soo gudbiyaa Maamulka Walaayada.

**Qod. 85**

Haddii aanan si kale uusan sharciga u dhigin, waxaa iska Maamulka Walaayaada awooda aqbalidda go'aanadda la xiriira arrimaha la xusay faqradda 3aad ilaa 11aad ee qodobka 16.

Haddii Maamulka Walaayaddu ay la noqoto in ay u diido aqbalida go'aankaasi waxaa la wargelin doona Maamulka Dowladda Hoose iyadoo laga sugi doono warcelin 30 beri gudahooda.

Haddii la waayo wax warcelin ah ee Maamulka Dowladda Hoose ama ay soo gudbiso, Maamulka Walaayadu waxay gaari doonta go'aankeeda.

**Qod. 86**

Go'aanadda aanan dooneynin in si gaar ah loo aqbalo waxay hirgeli doonan 30 beri kadib ay Maamulka Walaayaddu soo bandhigtay.

Muddadaas gudahooda Maamulka Walaayaddu waa in ay ku wargelisaa Maamulka Dowladda Hoose go'aankeeda ah in la baabiyey go'aankasto oo noqday mid aan sharciga waafaqsaneyn.

**Qod. 87**

Haddii ay jirto marxalado degdeg ah oo aanan la baajin Karin fulinta go'aan iyadoo la dhowraayo danaha Maamula Dowladda Hoose iyo midka dadweynaha, waxaa si degdeg ah loo hirgelin doona go'aanka lagu gaaro hal dheeri ee hey'adda go'aanka iska leh.

Asbaabta keentay marxaladda deg-degta ah waa in lagu caddeyo warbixinta go'aanka oo loo soo gudbiyaa Maamulka Walaayada.

Go'aanadaasi waa in loo soo gudbiyaa Maamulka Waalayada maalinta labaada eek u xigta maalintii la aqbalay.

**Qod. 88**

Maamulka Walaayadu waxaa u gudbin doonta Wasiirka qaabilsan nuqulka go'aanada la aqbalay ee la xiriira arrimaha canshuuradka, faayadhowrka, dhismaha iyo ciidanka deeganka. Wasiirkaasi wuxuu joojin kara gebi aahaan ama kala bar go'aanadasi haddii oo uu arko in aysan waafaqsaneyn sharciga iyo xeerarka.

**Qod. 89**

Haddii , markii la baarayo misaaniyadda, ay Maamulka Walaayadu u aragto in dib loogu noqdo sida uu qabo qod. 70, waxaa la weydin doona Wasiirka Arrimaha Gudaha in la ansixiyo misaaniyadda.

**Qod. 90**

Go'aanadda la aqbalay, oo noqday kuwan la fuliyey waa go'aanno hirgalay

Qoraallada Maamulka Walaayadu ay ku diiday aqbalida go'aanada iyo fulinta mashaariicda iyo dekreetoyinka caddeynahay in wax kama jiraan yihin waxaa lagu dabaqi doona qod. 92 ee la xiriira xatta Maamulka Dowladda Hoose.

**Qod. 91**

Guddomiyaha Deegaanka isagoo loo xilsaaray awooda kormeerka waxaa qassab ah in uu gudbiyo Xeer-Ilaaliya guud ahaan howlaha Maamulka Dowladda Hoose.

**Qod. 92**

Haddii uusan sharci kale qoraynin, Maamulka Dowladda Hoose waxay cabasho u diri karaan Wasiirka Arrimaha Gudaha oo lid ku ah go'aanada ay Maamulka Walaayadu gaaren.

Cabashadaasi waxaa qori kara keliya ciddi dan ka leh mana la qaban doono cabasho 30 beri kadib markii la ogeysiiyey go'aankaasi. Waxaay Maamulku amri doonata in la wargeliyo ciddii laga dacwooday muddada ku qoran faqradda sare ku qoran.

Muddada 30 beri gudahhooda maalintii la wargeliyey, dadka dacwada laga keenay waa in ay soo celiyaan doododa.

## CINWAANKA 6AAD

Ganaaxyada

**Qod. 94**

Haddii uusan sharci kale caddeyneynin, ganaaxa ka soo aroora ku xad gudubka xeerarka dowladda hoose waxay gaarayaan ilaa 400 Sh.

Sidoo kale isla lacagtaasi waxaa mudan doono ciddii aan dhowrin amarrada Duqa Magaalada sida ku cad sharciga iyo xeeraarka.

Qoraalka keydka ee ganaaxyada waa in uu caddeeya in ganaxaasi uu ka yimid muran

**Qod. 95**

Ganaxa ku qoran qodobka sare ku xusan waxaa loo ogol yahay dembilaha in uu dhiibo sarkaalka hubsaday dembigiisa.

Sarkaalka guddoomay lacagta ganaaxa ah waa in uu siiya nuqul caddeynta in uu guddoomaymaya, nuqulka kalena ay ugu hartay buuga lagu qoro ganaaxa.

Qiimaha ganaxa oo kus xusan faqradda 1aad waxaa guud ahaan u carifay amar-sharci oo uu soo saaray Duqa Magaalada, kaaso oo kala sooci doono noocyada dambiyada iyo ganaaxyada oo aan la hayn cafis.

Amarrada- sharci ee Duqa Magaalada waxaa lagu soo bandhigi doonaa muddo aan ka yareen 8 beri Bandhigga Dowladda Hoose.

Sarkaalka dowladda hoose ma cafin karo ganaax haddii uu sababy dhibaato dad kale ama Maamulka Dowladda Hoose.

**Qod. 96**

Haddii wax cafis ah la waayo, sida ku qoran qodobka hore ku qoran, ganaaxu waxaa laga keeni kara cabasho, taas oo muddo 10 beri gudahoodaha Duqa Magalada wuxuu carifi kara inta ugu badan ama ugu yare ee ganaxa oo la cafin karo sida ku qoran sharciga.

Haddii si toos ah loogugu geynin ganaaxa qofka dembilaha ah wuxuu 10 beri gudaho maalintii la ogeysiiyey in uu geyn karo 10 beri gudahooda codsi cafis sida ku cad faqradda hore ku xusan.

Haddii ganaaxu dhibaato gaarsinaaya cid saddexaad, Duqa Magaalada wuxuu warbixn ka dhegeysan doona dhibbanaha wuxuuna awood u leeyahay in uu cafis u oggolaanin haddii dembilouhu uusan aqbali soo jeedinta dhibanaha.

Kadib markii laga reebo marxaladda qod. 35aad, Duqaa Magaaladu, haddii ganaaxu dhibaato u geeysanayo Maamulka Dowladda Hoose wuxuu aqbali doona codsiga cafiska kadib markii uu dembiluhu istaajiyo asbaabaha ganaaxa keenay, Haddii muddada loo qabto uu ku dhameeyn waayo,codsigiisa waa la joojiyey, Duqa Magaaladuna wuxuu amri kara in la fuliyo howladha sida ku cad qod. 35aad.

**Qod. 97**

Haddii dembiluhu uusan codsanin cafis ama soo hor istaagin Duqa Magaalada, warbixinta ganaaxa waxaa loo gudbin doo Garsooraha Gobolka si loogu qaado dacwo ciqaabeed.

Amarkaani waxaa lagu dabaqi doona xattaa haddii dembiluhu uusan bixinin lacagta uu Duqa Magaaladu amray kadib markii la cafiyey amad codsigiisa cafis la diiday

**Qod. 98**

Lacag kasto ha ahaato mid ganaax ah ee ku saleysan xeerarka iyo danaha Maamulka Dowladda Hoose, ama amar-sharciga Duqa Magaaladda, ha ahatee lacag-dhismis cafis ku timid sida ku qoran qod. 95 iyo 96 waxaa iska leh Maamulka Dowladda Hoose.

Seddax u dhig hal dhig lacagaha ganaaxa ah waxaa meel loo dhigi doonaa si loo abaal mariyo saraakiisha baartay soona heshay dembiyada ganaaxu ka dhashay.

**CINWAANKA 7AAD**

Xoghayaha, Saraakiisha iyo Shaqaalaha

**Qod. 99**

Xoghayaha Deegaanka waa madaxa shaqaalaha waana mid hagaaya iskuna duba riddaya howlaha xafiiska iyo adeegyada dowladda hoose.

Wuxuu awood u leeyahay kormeerka howlaha guud ahaan wuxuu hoos yimaadaa Duqa Magaalada.

Xoghayahu wuxuu ka qeyb qaata fadhiyada xubnaha iska leh awoodda go’aan ka gaaridda arrimaha deegaanka isugana wuxuu xaq uu leeyahay in uu codeeyo.

Wuxuu mas’uul ka yahay soo bandhiga go’aanadda iyo qorallada kale oo xil ka saran yahay iyo u gudbintooda Maamulka Walaayada sida ku qoran.

Wuxuu had jeer kormeera joogtaynta keydka shurucda, dekreetoyin iyo xeerarka guud iyo kuwa dowladda hoose.

Wuxuu fulin doono howl kasto oo sharciga iyo xeerarku ku amraan

**Qod. 100**

Waxaa looga baahan yahay arrimahaan hoos ku qoran ciddii dooneyso in lagu magaacaabo Xoghayaha Deegaanka:

- Shahaadada Dugsiga Aqoonta Sare ama shahaado u dhiganta si loogu doorto Maamulka Dowladda Hoose ee Muqdisho;
- Shahaadada Dugsiga Sare ee Maamulka Deegaanka ee dufcadda B iyo C;

— Shahaadada Dugsiga Hoose ww Maamulka Deegaanka ee dufcadda D.

**Qod. 101**

Iyadoo uu Wasaaradda ay khuseeyso ogoshahay, Maamulka Deeganada ee dufcadda C iyo D, xilka Xoghayaha Deegaanka waxaa laga dhigi kara macallin Dugsiyada Hoose madaama ay misaaniyaddu yartahay.

Go'aannada lagu gaaray magdhaw waa in Maamulka Walaayadu ay aqbasho.

Kadib markii uu Guddiga Deegaanku codsado, Maamulka Dowladdeedyada Hoose oo dhisan muddada uu hirgalaayo xeernidaamiyahaan, laakin aanan haysanin guud ahaan ama si kala bar ah awooda shaqaaleynta ama in ay u xil saran macalliminta dugsiyada hoose xilka Xoghaye, wuxuu Xeer-Ilaaliyahu ku amri kara dekreetoin la shaqaaleeyo.Wuxuu sidoo kale amri kara in la isticmaalo goob dadweeyne ee Deegaanka.

**Qod. 102**

Xeerniddamiye lagu ansixiyey dekreeto ka soo baxday Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa qeexi doonta Maamul Dowlad Hoose ee kasta in ay yeeshaan xeer u gaar ah, kaas oo qeexaaya awoodaha Xoghayaha, shaqalaha iyo saraakiisha iyadoo la tilmaamayo howlahooda haddiii uusan si kale loo qorin:

1) Xeer nidaamiyaha xafiiska iyo goobaha muhimka ah oo lagu caddeyey shax tirada shaqaalaha iyo saraakiisa, aqoontooda iyo mushaarkooda;
2) Xaaladaha looga baahan yahay magacaabidda, habka iyo noocyada tartanka shaqada;
3) Amarrada la xirira shaqada horumarkeeda, dallacaadaha iyo mushaar kordhinta muddeysan iyo mushaaraadka;
4) Amarradda caddeynaya mas'uuliyadda shaqo, horumarka shaqada ee shaqaale kasta, iyo sacaadaha shaqada;
5) Nidaamyada la xiriira ganaaxyada iyo hakinta shaqada si ku meel gaar ah,
6) Nidaamyada la xiriira fassaxyada iyo xuquuqda ka soo aroorta,
7) Nidaama la xiriira ruqseynta iyo caymiska.

## CINWAANKA 8AAD

Waajibaadka Maamulayaasha iyo Shaqaalaha

**Qod. 103**

Maamulayaasha aqbala kharaj aanan horay loogu qorin misaaniyada ama go'aanka lagu aqbalay uusan waafaqsaneyn qabka uu sharcigu tilmaamayo, ama xambarsado mas'uuliyada iyo in la fuliyo howl aan sida sharcigu qabo aan lagu ansixinin asiga ayaa si too ah mas'uul uga ah wixii kharaj ah.

Waxaa kale ay Maamulayaashu mas'uuliyad toos ah xambarsan doonaan haddii ay ansixayaan daqli aan jirin si loo dheeli tiro misaaniyadda.

**Qod. 104**

Maamulayaashu waxaay mas'uul toos ah ka noqon doonaan sida ku qoran qodobka sare ku xusan haddii ay amraan in la maal geliyo deyn ah mashaaric ka hor intii uusaan hey'adda fulin doonto ay si sharci ah u oggolaanin in ay xambarsadaan deyntaasi ama dhibista kharaj hordhac ah ka hor intii aanan la helin kharajkaasi.

**Qod. 105**

Maamulayaashu waxay xambarsanayaan mas'uuliyadda ka timaado dhibaatooying ay u geeystaan hey'adaha kadib markii ay dan iyo heelo ka yeelan arjigooda ama canshuur uruurinta iyo daqliga caadi ah oo horay loo gooamiyey

**Qod. 106**

Maamulka Dowladda Hoose waxaa waajib ku ah in ay u celiyo madgdhaw lagu xukmiyo Guddomiyaha.

Ciddi si toos ah u leh mas'uuliyadda magdhowgaasi waxay gadal u ceelin doonan Maamulka Dowlaladda Hoose kadib markii xukun ku dhaco.

**Qod. 107**

Maamulayaasha iyo shaqaalaha waxay mas'uul ka yihiin dhibaatada ay si kas ama kama' ah u geystaan hey'ad ama dhinac seddaxadda.

Haddii dhibatadaasi ay tahay mid ula kac ah, maamulayaashu iyo shaqaaluhu si toos ay mas'uul ka noqon doonaan.

Haddii dhibatadaasi ay si guud ama kala bar ay geesteen waxay mas'uul ka noqon doonaan qeybta ay iyago geysteen.

**Qod. 108**

Waxaa ka reeban in loo qabsado magdhow, xubnaha maamulka deegaanka oo aanan ka qeyb qaadanin fadhiyada lagu qo'aamiyey go'aanada dhibaatada ka dhalatay amase si deg-deg ah ogeysiyey in ay ka soo horjeedan go'aankaasi oo dhibato ka dhalatay.

**Qod. 109**

Mas'uuliyada magdhowga waxaa hubsan doono Maamulka Walaayada, kaas oo sida sharcigu tilmaamay u soo gudbin doono eedeysanayaasha Qeybta Gaarka ah ee Maxkamadda Dalka Somaliya.

**Qod. 110**

La-Taliyaasha iyo Kalkaaliyaashu waa in aysan ka qeyb gelin shirarka lagu go'aamin doono arrimaha ay dan ugu jirto Maamulka Dowladda hoose ee u ka tirsan yahay, ama dan isagu leeyahay ama xubno ehelkooda ama shaqo siin dad ay dan ka leeyihiin. Waxaa waajib ku ah in ay ka dheeradaan goobta shirkaasi ka dhacaayo ilaa iyo intii go'aankaasi so bixi doono.

Waxaa ka reeban in ay ka qeyb qaatan si toos ah ama dadban adeegyada, cafiska maamulka tartanka u daneeynaaya Maamulkooda Dowladda Hoose.

**CINWAANKA 9AAD**

Amaradda ku Meel Gaarka ah

**Qod. 111**

Amarrada xeer nidamiyahaan ku qoran ee khuseeya qaabka Maamulka Dowladaha Hoose, iyo shuruudaha laga rabo xubnihiisa laguma dabaqi karo Maamulada

Dowladaha Hoose ee horay loo doortay, kuwaas oo xilka haydoono ilaa iyo doorashada xigta.

**Qod. 112**

Haddii ay tirada kuraasta ay ka badato tan lagu carifay qod. 19, waxaa la oggoladay tirade la-taliyeeyaasha haaya jagada ilaa iyo intii qodobka sare ku xusan uu tilmaamay.

**Qod. 113**

30 beri gudahooda maalintii uu hirgalo xeer-nidaamiyahaan, La-taliyeyaasha Deeganku oo xilka haaya waxaay dooran doonan Duqa Magaalada, Madasha Deegaanka iyadoo la tixraacay sharciga

Marxaladah aysan taas ka jirin Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa magaccabi doono Guddomiye, kaas oo gudan doono wajiibaadkiisa ku cad sharcigaa ee Duqa Magaalada iyo Madasha Deeganka.

**Qod. 114**

Ilaa iyo 5 sano intii ay yihiin Xoghaye Deegan, waxaa laga reebay in ay yeeshay waxbarasho sida uu qabo qod. 100m, marba haddii ay gudan karaan mas'uuliyadda saran.

**Qod. 115**

Haddii aanan la soo bandhigin xeer-nidaamiyo sida ku cad qod. 102, Wasiirka Arrimaha Gudaha isagoo la tashtay Duqa Magaalada iyo Maamulka Walaayada wuxuu magacaabi doona Xoghaya Deeganka.

**Qod. 116**

Waxa la baa'biyey amarrada-sharci lamb. 19 ee 11 Seteembar 1954 iyo lamb. 20 ee 11 Seteembar 1954 iyo lamb. 4 ee 30 Maarso 1955 iyo xeer kasto oo aanan la socon Karin xeer-nidaamiyahaa.

Maalinta uu hirgali xeerkaani, Maamuladah Deegaanku waa in ay la socdaan xeer-nidaamiyaan cusub haddii aysan jirin sharci si kale u dhigaaya.

**Qod. 117**

Wasiirka Arrimaha Gudahaha wuxuu soo saari kara dekreetoyin oo noqon karo kuwa ku meel gaar ah haddii loo baahdo ama gebi ahaanteed beddeli karo xeerkaan si loo xaliyo arrimaha u gaar noqon karo ama xaqiijiyo fal galka howlaha Maamulka dowladaha hoose

Xeerkaani waxa lagu qori doona Keydka Rasmiga ah ee shuruucda oo ay ku soo bixi doonta Faafinta Rasmiga. Waxaa la faraaya in cid kasto u hoggansanaado, una hoggamiyo dadweynaha.

Muqdisho, 30 Seteembar 1956.

**Anzillotti**

**HAGI MUSSA BOQOR** **ABDULLAHI ISSA MOHAMUD**